Miisaaniyad Sannadeedka Maaliyadeed ee FY25 - Warbixinta Abriil 5, 2024

Hoggaamiyeyaasha Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) iyo shaqaalaha degmada oo dhan ayaa kulmayey tan iyo xagaagi lasoo dhaafay si ay miisaaniyad ugu dejiyaan sanadka soo socda taasoo ah mid loo siman yahay, dheellitiran, kana tarjumeysa qiyamka bulshadeena. Iyada oo loo marayo ka-qaybgal ballaaran oo la sameeyay gu'gi iyo dayrti 2023, waxaanu ogaanay in ardaydeena, qoysaska, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada ay qiimeeyaan dugsiyada badbaadada ah, ixtiraamka leh, kana tarjuma dhaqamada kala duwan iyo baahiyaha waxbarasho ee ardaydeena. Qiyamyadani, iyo sidoo kale mudnaanteena waxbarida ee akhris-qoraalka, waxay hageen go'aannadeena ku saabsan miisaaniyadda sannadka soo socda.

Marki hannaankani bilowday sanadki la soo dhaafay, miisaaniyad-gabaabsiga la filay waxay ahayd ku dhawaad $150 milyan. Tan iyo markaa, waxaan ka shaqeynay in aanu aqoonsano tashiilka kharashaadka iyo dhimista miisaaniyad gaaraysa $130.6 milyan. Eeg jaantusyada hoose si aad u aragto dulmar ku saabsan dhimista la aqoonsaday ilaa iyo hadda iyo qaar kamid ah isbeddelada ay qoysaska iyo shaqaaluhu ku arki doonaan dugsiyada iyo barnaamijyada sanadka soo socda.

Bartilmaameedka Dhimista Miisaaniyadda ee Sanad Maaliyadeedka 2025 (Wadarta Socota laga bilaabo Abriil 3, 2024)

Soo Koobidda Dhimista/Tashiilka Miisaaniyadda	Saamaynta Miisaaniyadda	Gabaabsiga Wadarta Socota	Taariikhda
Gabaabsiga Miisaaniyadda FY25 ee La Qiyaasay	-	**-$150.3M**	Dayrta 2023
FY24: Dakhli cusub, keydadka caymiska shaqo la'aanta FY25: Kharashaadka halka mar ah ee ARP, kaalmada gobolka ee dheeraad ah, kaalmada magdhowga ee dheeraad ah	**$42.8M**	**-$107.5M**	Janaayo 2024
Joojinta/dhimista barnaamijyada iyo shaqaalaha ARP ay maalgeliso iyo kuwa aanay maalgelin ARP, keydadka lacag-bixinta dheeriga ah, keydadka qoondaynta dugsiga	**$71.3M**	**-$36.2M**	Febraayo/ Maarso 2024
Dhimista dheeraadka ah ee shaqaalaha iyo adeegyada degmada	**$16.3M**	**-$19.7M**	**Abriil 2024**

Waqti xaadirkan, SPPS waxay haysataa $19.7 milyan oo u hartay inay dhinto si ay miisaaniyad dheellitiran u gaarto sanad maaliyadeedka 2025 (FY25). Degmada waxaa laga yaabaa inay isticmaasho qaar kamid ah baaqigeeda lacagta u hartay si ay u buuxiso nusqaanta miisaaniyadda. Miisaaniyadda FY25 waa in ay Guddiga Waxbarashadu ansixiyaan bisha Juun.

Saambalka Isbeddelada Dugsiyada iyo Barnaamijyada 2024-25

Heerka Fasalka/Barnaamijka	FY24	FY25 (Isbeddelka)	Xog Dheeraad Ah
Carruurnimada Hore	Xarunta Carruurnimada Hore - Labo goobood	Xarunta Carruurnimada Hore - Hal goob	Bariga Xarunta Carruurnimada Hore waxay la midoobi doontaa Xarunta Galbeed.
Dugsi Hoose	Ma jiraan fasallo isku dhafan (la isu keenayo) ee fasalka saddexaad ee dugsiga barbaarinta	Ma jiraan fasallo isku dhafan (la isu keenayo) ee fasalka koowaad ee dugsiga barbaarinta	Fasallo isku dhafan (la isu keenayo) ayaa loo oggolaan doonaa fasallada 2, 3, 4 iyo 5.
Dugsi Hoose	Maadooyinka ay dhigaan khubarrada takhasuska leh waxaa go'aamiyay dugsi kasta.	Khabiirada Sayniska iyo Waxbarashada Jireed (PE) waa in marka koowaad mudnaanta la siiyaa, oo ay soo raacaan muusigga ama farshaxanka ee dugsiyada badankooda (luuqadda dugsiyada IB).	Tirada khabiirada waxay lamid ahaan doontaa middi aafada caabuqa kahor iyada oo ay ugu wacan tahay luminta ARP; macalimiinta fasalka waxay taageeri doonaan heerarka waxbarasho dhammaystiran.
Dugsi Hoose/ Dugsi Dhexe	Macalimiinta WINN (Waxa Aan Hadda U Baahanahay) Reading ee ardayda dhigata fasalada K-2 iyo 6-8 ee u baahan taageero dheeraad ah	Macalimiinta WINN Reading ee ardayda dhigata fasalada 3-5 iyo 6-8 ee u baahan taageero dheeraad ah	Sida ku cad xogta, ardayda dhigata fasaladaan waxay aad ugu baahi qabaan taageerada WINN Reading. Dugsi kasta oo hoose ama dhexe wuxuu lahaan doonaa hal macalin oo WINN Reading ah.
Dugsi Dhexe/Sare	Dugsiyada waxaa dhigaya macalimiin ku filan si loogu oggolaado tirada fasalka inay noqoto lix arday kayar celceliska xadka cabbirka fasalka	Dugsiyada waxaa dhigaya macalimiin ku filan si loogu oggolaado tirada fasalka inay noqoto afar arday kayar celceliska xadka cabbirka fasalka	Tirada fasalka waxay ka hooseyn doontaa xadka loo baahan yahay ee cabbirka fasalka

Dugsi Sare	Afar dugsi sare oo leh heerka ugu hooseeya ee qalin-jabinta ayaa leh macalinka buundo soo kabashada Dhammaan dugsiyada sare ayaa leh khabiirka wax-kaqabashada buundo soo kabashada	Ma jiraan macalimiinta buundo soo kabashada ama khabiirada wax-kaqabashada buundo soo kabashada	Buundo kabashada lama heli doono inta lagu jiro maalinta dugsiga. Waxaa la sii heli doonaa dugsiga kadib iyo xilliga saamarka.
Taageerooyinka Tignoolajiyadda Waxbarashada	Dugsiyada ayaa leh Macalimiinta Tignoolajiyadda ee Leyliga Gaarka ah (TOSA-yada) si loogu taageero baahiyaha tignoolajiyadeed ee dugsiyada	Dugsiyada ma yeelan doonaan Tignoolajiyadda TOSA-yada.	Farsamo-yaqaanada Goobta oo dheeraad ah ayaa dugsiyada ka taageeri doona baahiyaha tignoolajiyadda.
Adeegyada Maktabadda	Khabiirka Warbaahinta Ruqsadda Haysta (LMS) oo jooga dhammaan dugsiyada sare. Kaaliyeyaasha waxbarashada (EA-yada) waxay taageeraan maktabadaha dugsiyada hoose.	LMS ku sugan dhammaan dugsiyada sare. Kordhinta shaqaalaha ku sugan dugsiyada hoose si ay u xaqiijiyaan in maktabadaha ay ahaadaan kuwo la adeegsan karo.	Kordhinta shaqaalaha ku sugan dugsiyada hoose si ay u xaqiijiyaan in maktabadaha ay adeegsan karaan ardayda.
Tas-hiilaadka	Kordhinta shaqaalaha nadaafada iyo dayactirka, sifeynta hawada iyo borotokoolada caabuq-dilista oo laga maalgelinayo ARP	Luminta dhammaan shaqaalaha nadaafada iyo dayactirka ee ay maalgeliso ARP iyo saadka iyo dhimis dheeraad ah	Dhimista baaxadda nadiifinta maalinlaha ah iyo awoodda lagu fulinayo dalabaadka shaqada dayactirka
Adeegyada Nafaqada	Kordhinta shaqaalaha Adeegyada Nafaqada oo ay maalgelineyso ARP	Dhimista heerarka shaqaalaha Adeegyada Nafaqada iyo isbeddelo ku yimaada liiska dalabka	Isbeddelo lagu sameeyo sheeyaasha dalabka cuntada iyo sahayda adeegga cuntada ayaa noqon doona lagama maarmaan
Gaadiidka	Inta badan dugsiyada SPPS	Inta badan dugsiyada SPPS	Dhimista daboolista keydka waxay

	waxay adeegsadaan basaska jaalaha ah si ay ardayda ugu geeyaan ugana soo celiyaan iskuulka	waxay sii wadi doonaan inay adeegsadaan basaska jaalaha ah si ay ardayda ugu geeyaan ugana soo celiyaan iskuulka	sababi kartaa baaqashooyin ku yimaada wadada
Barnaamijka Title I	Dugsiyada leh 49.1% ama kabadan oo ah arday uqalmaysa kababka waxbarasho waxay helaan lacagaha barnaamijka Title I	Dugsiyada leh 48.4% ama kabadan oo ah arday uqalmaysa kababka waxbarasho waxay helaan lacagaha barnaamijka Title I	Dhimista ama luminta maalgelinta barnaamijka Title I ee iskuulada qaarkood iyada oo ay ugu wacan tahay qoysas tiro yar oo buuxinaya foomamka ama lacagaha baaqiga ee la heli karo oo yar
Waaxyaha Degmada	Kordhinta heerarka shaqaalaha iyo qandaraasyada dibedda maalgelinta ARP darteed	Dhimista shaqaalaha, qandaraasyada dibedda, saadka iyo agabka ka sarreeya kana baxsan maalgelinta ARP	Hoos u dhaca marin-u-helka adeegyada degmada ee kala duwan ee loogu talagalay shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha bulshada

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada horay loogu aqoonsaday inay sii socdaan ama la joojiyo sanadka soo socdo, fadlan u tixraac warbixinada miisaaniyadda FY25 ee Febraayo iyo Maarso. Waxaad sidoo kale dib-u-eegi kartaa bandhiggi Abriil 3 ee Guddiga Guddiyada iyo maqalka duuban si aad uga heshid faahfaahin dheeraad ah iyo doodi.

Waxaa xusid mudan in la ogaado in miisaaniyadaha la dhimay ay ka dhigan yihiin luminta barnaamijyada iyo shaqaalaha heer iskuul iyo heer degmo labadaba. In kastoo aan rajaynayno in dhimistani aanay daruuri ahayn, waxaa naga go'an in aanu gaarno miisaaniyad dheellitiran oo u adeegta ardaydeena ilaalisana hadafkeena ah dhiirigelinta ardayda in ay si dhab ah u fikiraan, ka dhabeeyaan riyooyinkooda, waxna ka beddelaan adduunka.

Kulamada Xogta Miisaaniyadda Dugsiga

Waxaanu sii wadi doonaa in aanu miisaaniyadda FY25 idinkula socodsiino iimayl, webseedka miisaaniyadda FY25 iyo kulamada Guddida Waxbarashada. Waxaa intaa dheer, qoysasku waa inay la socdaan macluumaadka ka yimaada iskuulkooda ee ku saabsan shirarka miisaaniyadda ee soo socda ee dhacaya Abriil iyo May. Kulamadani waxaa loogu talagalay inay xubnaha bulshada ee iskuul kasta ka xogsiiyaan miisaaniyadda iskuulka iyo isbeddelada shaqaalaha ee sanadka soo socda.

Warbixinadi miisaaniyadda ee hore iyo macluumaadka kale waxaa laga heli karaa spps.org/fy25budget. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa foomka Jawaab-celinta Miisaaniyadda FY25 si aad ugu gudbiso faallooyinka ama su'aalaha ee lagu dari karo Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee ku qoran webseedkan.